



TUSUHA SICIRKA BADEECADAHA

SIBTEEMBAR 2020

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Sibteembar 2020 ayaa ahaa 120.63, marka la barbardhigo 120.09 bisha Agoosto 2020.

Isbedel bileedka, Sibteembar 2020, marka la barbar dhigo Agoosto 2020, ayaa sare u kacay 0.45 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo hoos u dhac dhan -0.86 boqolkiiba bishii Agoosto 2020. Majirin qiima koror bille ah inta lagu guda jiray bishii Sibteembar (Jaantuska 2aad).

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Sibteembar 2019 iyo Sibteembar 2020) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu hoos u dhacay 3.93 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 4.05 boqolkiiba ee 12kii bilood (Agoosto 2019 iyo Agoosto 2020).

Shaxda 1: Sicir Bararka, Tusaha Sicirka Badeecadaha; Sibteembar 2020 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Sibteembar 2020	
Tusaha bishan Sibteembar 2020	120.63
Tusaha bishii hore Agoosto 2020	120.09
Tusaha sanadkii hore Sibteembar 2019	116.07
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.45%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	3.93%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB

Isbedelka boqoleyda ee 12bilood

Tixraaca TSB

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: SNBS

War bixin bileedka bisha Agoosto 2020 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Sibteembar 2020

Heerka sicir-bararka bisha Sibteembar 2020 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Sibteembar 2019 iyo Sibteembar 2020.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 3.93 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Sibteembar 2019 iyo Sibteembar 2020, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Agoosto 2019 iyo Agoosto 2020 uu ahaa 4.05 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB isbedalka billaha ah ayaa ahaa sare u kac gaaraya 0.45 boqolkiiba bisha Sibteembar 2020, marka la barbardhigo hoos u dhac dhan -0.86 boqolkiiba bishii Agoosto 2020.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Sibteembar 2020.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 0.44 boqolkiiba, inta lagu jiray bishii Sibteembar marka la barbardhigo hoos u dhaca bishii Agoosto 2020 oo ahaa -2.51. taasna waxaa sababay qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah oo qiimaheedu sare u kacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -3.11 boqolkiiba Sibteembar 2020. marka barbardhigo sicir bararka sanadlaha ahaa -2.21 boqolkiiba Agoosto 2020.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa laga dareemayey hoos u dhac bille ah, oo ahaa 0.42 boqolkiiba intii lagu guda jiray Sibteembar 2020, marka la barbardhigo sare u kac bille ah 5.71 boqolkiiba bishii Agoosto 2020. Sare u kac sanadlaha ah ee bisha Sibteembar 2020 ayaa gaaray 12.22 boqolkiiba, marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah ee bishii Agoosto 2020 oo ahaa 11.60 boqolkiiba.

dhammaan qeybaha TSB & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: SNBS

War bixin bileedka bisha **Sibteembar 2020** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Sibteembar 2020 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sanadlaha ah sare u kacay 19.95 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (+22.05 boqolkiiba) taasoo ka dhalatay sare u kac ku yimid dharka dumarka oo gaaray (+23.65 boqolkiiba), caruurta (26.31 boqolkiiba iyo kabaha +19.09 boqolkiiba).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaas** ayaa muujiyey sare u kac Sanadle ah oo gaaraya 12.22 boqolkiiba bisha Sibteembar 2020, sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa qiimaha qalabka guryaha lagu dayactiro oo gaaray 10.58 boqolkiiba. qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid rinjiyeynta guryaha oo gaaray +36.36 boqolkiiba).
- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya (22.07 boqolkiiba) bishii Sibteembar. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Cusbitalada oo gaaray (+94.41 boqolkiiba). Qiima kororka ayaa ka yimid adeega daweynta bukaanada oo gaaray (+150.00 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 7.34 boqolkiiba ee Sibteembar 2020, marka la barbardhigo 6.09 boqolkiiba oo la diiwaan geliyey bishii Agoosto 2020. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Qalabka quraaradaha, miisaska, iyo Maacuunta guryaha (+8.78 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 15.42 boqolkiiba Sibteembar 2020. Sare u kaca waxaa sababay Qalabka iyo alaabada daryeelka shakhsi ahaaneed oo qiimihoodu gaaray (+12.97 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha saliida timaha (+108.33 boqolkiiba).
- **Isgaarsiinta** ayaa qiimaheedu kordhay (5.17 boqolkiiba) bisha Sibteembar 2020. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Telefonada iyo telefax (+5.06 boqolkiiba).
- **Qiimaha Adeega Gaadiidka** ayaa muujiyey sare u kac Sanadle ah oo gaaraya 3.44 boqolkiiba bisha Sibteembar 2020 marka la barbardhigo 0.81 boqolkiiba Agoosto 2020. inta badan sare u kac ayaa ka yimid u kala daabulista agabka shaqsiyadeed oo gaaray (+7.09 boqolkiiba)

War bixin bileedka bisha **Sibteembar 2020** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Sibteembar 2020 (-)

- Guud ahaan, dhamaan qeybaha majiraan isbedel qiima dhac muuqda oo la taaban karo bisha Sibteembar 2020.

B. Heerka sicirbararka marka loo eego tusha sicirka badeecadaha

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Sibteembar 2020

(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Sibteembar 2020 (+)

- Guud ahaan, dhamaan qeybaha majiraan isbedel qiima koror muuqda oo la taaban karo bisha Sibteembar 2020
-

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Sibteembar 2020 (-)

- Guud ahaan, dhamaan qeybaha majiraan isbedel qiima dhac muuqda oo la taaban karo bisha Sibteembar 2020

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Sibteembar 2020 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Sebt 2019 TSB	Agoost 2020 TSB	Sebt 2020 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishaan	% Boqolkiib Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan qeybaha TSB	100.00	116.07	120.09	120.63	0.45	3.93
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	124.73	120.32	120.85	0.44	-3.11
Tubaakadda	1.25	146.95	137.35	137.35	0.00	-6.54
Dharka & Kabaha	5.03	120.60	143.37	144.66	0.90	19.95
Guryaha, Biyaha, Korontada& Gaaska	23.41	103.33	115.47	115.96	0.42	12.22
Agabka Guryaha	2.93	102.71	108.96	110.24	1.17	7.34
Caafimaadka	5.00	118.92	145.16	145.16	0.00	22.07
Gaadiidka	3.77	108.28	110.83	112.00	1.06	3.44
Isgaarsiinta	2.80	96.32	101.31	101.31	0.00	5.17
Hawo bedeshada & dhaqanka	1.00	97.30	98.54	98.54	0.00	1.28
Tacliinta	4.00	105.93	106.27	106.27	0.00	0.32
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	135.88	136.61	136.61	0.00	0.53
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	104.27	119.06	120.35	1.08	15.42

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta


Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Octoobar 2020 waxaa la baahindoonaa 15th Nofeembar 2020. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku sasabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogen arasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

War bixin bileedka bisha **Sibteembar 2020** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Sibteembar 2020 marka loo eego COICOPka

Dhamman qeybaha TSB

Qeybaha ka qeybqaata (%) Heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: SNBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha Sibteembar 2020 (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia